**Duqa magaalada Michelle Wu**

**Khudbadda Xaaladda Magaaladda • Maarso 19, 2025**

Maqrib wanaagsan, Boston!

Waad mahadsantihiin martigeliyaasheena MGM Music Hall, iyo dhammaan turjubaanadeena caawa.

**Duqa Magaalada Healey, Xildhibaanad Pressley, Madaxweynaha Gollaha Louijeune, Guddoomiyaha Robinson, Duqa Magaalada Janey**, iyo dhammaan caasimadeena, gobolkeena, iyo saraakiisha gobolka: Iskaashigiina wuxuu ka dhigaa shaqadeena suurtogal. Mahad sannid.

Shaqaalaheena Caasimada: Xili markii shaqaalahii dowlada la eryay oo la xaqiray, waxaad sii wadeen inaad u imaataan dagayaasheena oo aad na xasuusisaan waxa maamul wanaaga yahay. Waad ku mahadsantihiin dajinta heerka maalin walba.

Ku socota qoyskeygaan halkaan jooga caawa—ninkeyga **Conor**; walaalaha weyn ee igu qaaliga ah, **Blaise** iyo **Cass**; iyo canuga **Mira**—aad ayaan u nasiib badannahay; aad baan idin jeclahay.

Iyo dadka reer Boston: Waad ku mahadsantihiin sharafta aad ku qabateen shaqadaan oo aan idinku wehliyo.

---

Laba usbuuc ka hor, waxaan u dhaadhacay D.C. sababtoo ah Aqalka sare waxay qabeen su'aalaha qaar ee ku saabsan sida aan wax ugu sameyno halkaan ee Boston.

Waxaa laga yaabaa inay aheyd codkeyga oo ku hadlaya makarafoonka maalintaas, laakiin waxay aheyd 700,000 oo codad ee siiyay Aqalka sare jawaabtooda:

Tan waa magaaladeena.

Ma jiro qof u sheego Boston sida aan u daryeelno waxeena… ma ahan boqoro, iyo ma ahan madaxweynayaal u maleeya inay boqoro yihiin. Boston waxay dhalatay iyadoo ka adkaaneyso xoog sheegsiyada.

D.C., inta lagu guda jiray nasashada si aan u nuujiyo ilmaha, waxaan ku soo gaaray goobta oo dib ugu laabaneyso guriga:

Gacmaha ayaa isugu biiray doco oo guud ahaan diimaha kala duwan ee St. Paul… warqado dhalaalaya ayaa iftiimiyay bulkeetiyada Aqalka Cad ee Duuga ahaa… aastaamaha guriga lagu sameeyay oo ay si sare ugu muujiyeen dadkii isugu soo baxay City Hall Plaza: “Waxaan la garab taagannahay muhaajariinta," "Halkaan ayaad ka tirsan tihiin," "Somos una ciudad de inmigrantes," "Boston dib uma laabaneyso.”

Waxaan nahay caasimada halka qaxwaha Irishka ay ku xoogantahay iyo afkaaraheena ay xooganyihiin. Waxaa laga yaabaa inaan marwalba iskugu raacin ama aanan isu arkin waji ka wajii, laakiin dhamaadka maalinta, waxaan nahay qoys…

Haddii aad u timaado mid inaga mid ah, waxaad heleysaa inagoo dhan.

Waxaan nahay caasimad taqaana in awoodeena ay tahay midba midka kale: Oo waxaan ku difaaci doonaa dadka aan u jecelnahay dhammaan waxaan haysano.

Markii culeyska caalamka uu hoos noo dhigo, Boston way joogsataa.

Waxaa u sabab ah bulshadaan—iyo shaqada aan wada sameynay—ee ii suurtogashay inaan taago gacanteyda midig, ku dhaarto dhaar, oo aan runta u sheego qaranka: Boston-taas waa caasimada ugu wanaagsan caalamka.

---

Waxaan nahay caasimada qiimeyso dadaalka adag—meeshaas oo xubnaha **UNITE HERE Local 26** ay sugaan qaran horseed u ah heshiiska si markaas, shaqaalaha hoteelka ama soo dhaweynta ee socodsiiyo warshadaha dalxiiska Boston, hal shaqo ayaa ku fillan…

Waxaan nahay caasimad socodsiiso hal abuurka—meeshaas oo saynisyahanada ee **Vertex** ay hindiseen xeeladaha xanuun baabi'inta ee nolosha badesho, si loola dagaalamo xanuunka iyo cudurka safmarka...

Waxaan nanahay caasimad diirada saarto aasaaska maalinlaha—taasoo buuxineyso 15,000 godad…oo ka jarayso xargaha 20 darjiimo iyo garoomo…abuurayso in ka badan 5,000 geedo iyo balaarinayso adeega maktabada oo 10,000 saacadood…hagaajinayso in ka badan 30 mayl oo jid socodka iyo 60 mayl oo wada ah.

Waxaan nahahay caasimad meeshaas oo hot dhooga iyo resbariga liimada ee **Sullivan’s** ay yihiin abaalmarinta James Beard, iyo meesha carruurta lagu

magacaabay **Ayo** iyo **Jeremy** ee Dorchester iyo JP ku koraan illaa guusha Emmys iyo Tonys.

Waxaan nahay caasimad buuxisa wadooyinka markii kooxaheena ay keenaan guriga boorar:

Hambalyo horyaalada kooxaha wiilasha kubada koleyga ee gobolka Charlestown iyo New Mission; lagdinta gabdhaha Josiah Quincy; kubada usha wiilasha Boston Latin'; iyo Kubadda Koleyga English High…Iyo **Boston Celtics** ayaa sidoo kale aad u wanaagsan!

Iyo, wadajirka ka jawaabayaasheena koowaad, shaqaalaha caafimaadka dadweynaha safka hore, hogaamada diinta, iyo jaalalka xaafad walba, waxaan ka dhignay Boston caasimada ugu badqabsan qaranka.

---

Afar sanno ka hor, rabshada qoriga ee Boston ayaa gaartay hadda heerkii ugu sareeyo toban sanno. Sannad walba tan iyo markaan xafiiska la wareegay, waxaannu dhignay rikoorro cusub…Waad mahadsantahay **Guddoomiye Michael Cox** iyo dhammaan Waaxda Booliska Boston.

Hoggaamintaada hoosteeda, booliiska bulshada wuxuu gaaray heer cusub oo kalsooni leh… oo diirada saara badqabka iyo tayada nolosha Magaalada Gunteeda iyo dhammaan xaafadaheena guud ahaan. Waxaan shaqaaleysiinay saraakiilo cusub oo heerarka ugu balaaran oo aad u kala duwan ee Machadka, oo aan u dajinay heerarka qaranka oo loo adeegsado isla xisaabtanka oo waxaan dib ugu habeynay dhinaca heshiiska booliska: Dabayaaqada sannadkaan, dagayaasha Boston waxaa loo tababarayaa sida shaqaalaha wadada rayidka oo markii ugu horeysay ah, iyagoo helaya mushaar fiican iyagoo naga dhigayo kuwo badqab ah.

Afar sanno ka hor, kala duwanaanshaha caafimaadka jinsiyadeed ayaa sii dheeraaday. Maanta, Guddida Caafimaadka Dadweynaha Boston waxay sameynayaan hormar ay kaga hortagayaan kala duwanaanshahaas iyagoo u marayo waxqabad la bartilmaameedsaday oo iska badinta daroogada, caafimaadka dhallaanka iyo hooyada, iyo cudurada raago.
Mahadsanid, **Dhaqtar Bisola Ojikutu** iyo dhammaan jaalalkeena sinnaanta caafimaadka.

Afar sanno ka hor, ganacsiyada sida **Eli Lilly, S-A-P, Roche, LEGO**, iyo **NVIDIA** (en-vih-dee-uh) ayaa ugu yeeray caasimadaha kale guriga. Maanta, waxay dhammaantood doorteen Boston.

Si loo sii wado xawligaas, caawa waxaan ku dhawaaqayaa in Magaaladu ay bilaabi doonto Xafiiska Shaqaalaysiinta Ganacsiga si uu u buuxiyo boosas

ganacsi, sii haysto oo u soo jiito kartida, oo uu sii wado dib u soo noolaynta Magaalada Hoose. Waad ku mahasantahiin **Shaqaale Howleedkeena Shaqaaleysiinta Ganacsiga** iyo **Kooxda Shaqada Badrooniga Boston** nala jaal noqoshadiina looga dhigayo Boston meesha ugu fiican ee lagu ganacsado.

Sannooyin ka hor, Boston ayaa laheyd boosas yar oo Madowga leeyihiin si bulshada isugu yimaadaan oo isugu xirmaan. Tan iyo intaan xafiiska la wareegnay, waxay laba jibaarantay wax ka badan laba jibaar: Laga bilaabo **Grace by Nia** ee Seaport, **Hue** ee Back Bay, iyo **Park 54** ee Hyde Park, illaa **the Mix** ee Dorchester, iyo **Jazz Urbane** oo furmeyso xagaagaan, oo gagaarka geeska laga bilaabo **Soul & Spice** ee Nubian Square. Waad ku mahadsantihiin dhammaan ganacsatadeena maalgashigiina Boston.

Iyo hogaaminta gollaha Caasimada iyo Aqalka Gobolka, waxaan ku darnay shatiyada cusub ee qamriga tan iyo Mamnuucida: 225 fursado cusub ee loogu tallogalay maqaayadaha xaafada si ay u abuuraan shaqooyin, u daboolaan boosaska banaan, oo ay u dhisaan bulsho.

Afar sanno ka hor, Caasimada ma aysan sameyneynin si ku fillan oo ay ku taageerto ganacsiyada kala duwan. Sannadka la soo dhaafay kaligii, waxaan ku abaalmarinay in ka badan $150 milyan oo qandaraasyada caasimada ee ganacsiyada ay leeyihiin dadka midibka ah—in ka badan laba jibaar qiyamka 2021.

Iyo afar sanno ka hor, ciyaartoyda ardayda BPS waxaa looga tagay xarunta ciyaaraha oo marmar un la furayay oo sii burbureysay afartameeyo sanno. Maanta, waxaan u dayactireynaa White Stadium xarun ciyaartoyda heer caalami ah oo loo damaanad qaaday ardayda BPS, tababarayaasha, iyo dagayaasha 15 saacadood maalinkii, in ka badan 345 maalmood oo sannadka ah… Iyo marnaba maka joogsan doono u dagaalanka waxa ay carruurta caasimadeena u qalmaan. Waad ku mahadsantihiin dhammaan tababaradeena, ardayda, u doodayaasha, iyo **Isbaheysiga Darjiinka Franklin (Franklin Park Coalition)** hagida aan na hagteen.

---

Inta lagu jiray afartii sanno ee la soo dhaafay, waxaan u muujinay wadanka waxa ay u egtahay dhisida koox muujiso bulshadeena—oo dhisto aasaaska lagu raadraacayo caqabadaha aanan qofna u maleyn inay suurtogal tahay.

Si wadajir ah, waxaan u muujinay caalamka inaad dhisi kartaan caasimad badqab ah, cagaaran, iyo koritaan leh—guri qof walba loogu tallogalay—haddii aad diido inaad ka niyad jabtid.

---

Maanta, Boston way xoogantahay, aad ay uga go'antahay, oo aad ugu faanto abid inaan ahaano cida aan nahay…waqtiga lagu jiro markii aan isu baahannhay…iyo wadankeena u baahanyahay Boston.

Marka caawa, waxaan dhihi karaa in Gobolka Caasimadeena waa ay xoogantahay…oo waa inaan ahaanaa sidaas.

---

Sababtoo ah wadankoo dhan, dadka waxay dareemayaan culeyska maamulka faderaalka oo weerarayo illaheena awooda—isla dadka iyo ujeedada ka dhigeysa Boston mid wanaagsan:

Shaqaalaha dowlada iyo halyeeyada…muhaajariinta iyo bulshada LGBTQ+…machadyada sameeyo cilmi baarista aasaasiga ah oo bixiyo daryeelka nafta badbaadiso.

Waxaan hoy u nahay isbitaalada wadanka ugu fiican, kulliyadaha iyo jaamacadaha ugu fiican, sheybaarada ugu fiican iyo xarumaha cilmi baarista—waxay hormariyaan dhaqaalaheena, howlgeliyaan dagayaasheena, oo ay ka dhigaan Boston matoorka hal abuurka Mareykanka. Iyo maanta, dhammaantood weerar ayaa hayo.

Boston waa bartilmaameedka dagaalkaan ee mustaqbalkeena sababtoo ah waxaan nahay curdinka dimuqraadiyada, hormuudka danta guud, wakiilada iyo illaaliyayaasha Riyada Mareykanka. Waxaan ku dhisannahay qiyamyada maamulkaan faderaalka raadinayaan inay dumiyaan.

Laakiin 395 sanno, ha imaadaan biyo sare ama naar—dhibaato maleh cida ku hanjabto inay keento—Boston waxay u joogsatay dadka aan jecelnahay iyo wadanka aan dhisnay. Iyo ma joogsaneyno hadda.

---

Si aan hoy ugu noqono qof walba, waa inaan ahaanaa caasimada ugu fiican qoysaska, oo waxaa jiro shaqo badan oo la qabanayo.

Tan iyo markaan xafiiska la wareegnay, waxaan ku caawinay in ka badan 850 dadka deegaanka inay iibsadaan guryahooda ugu horeeyay. Waxaan dhisnay in ka badan 11,000 qeybo cusub, iyo guryaha ugu goynta badan oo ugu yaraan 25 sanno.

Sadexdii sanno ee la soo dhaafay, waxaan ka saarnay in ka badan 700 guryo suuqa mala waalka si aan uga dhigno guryo joogta ah oo la goyn karo.

Isbuucii la soo dhaafay, waxaan ku biiray **Mudane. Annie** ee Fairlawn Estates ee Mattapan—halkaasoo ay ku nooleyd konton sanno. Iyo lixdii sanno ee la soo dhaafay, waxay hogaamisay ururkeeda kireysiga iyadoo la dagaalameyso

kirada korodhay iyo ka saarida oo ay ugu tallogashay inay ku badesho bulshadeeda—aoo way ku guuleysatay.

Si wadajir ah, iyo CityLife/Vida Urbana, Related Beal, iyo bahwadaagteena Sanduuqa Iibsiga Guryaha, waxaa noo suurtogashay inaan illaalino dhammaan 347 guryo oo aan ka dhigno joogta loo goyn karo. Gabar Annie iyo qoyska Fairlawn ayaa halkaan jooga caawa!

Waxaan sidoo kale la shaqeyneynaa hormariyayaasha si ay ugu badelaan booska xafiiska aan la isticmaalin guryo badan oo qoysaska ah. Xagaaga xigga, waxaan yeelaneynaa 1,000 guryo cusub oo dhismo ku socdo oo baratamaha Magaalada hoose ku yaala.

Caawa, waxaan ku dhawaaqayaa inaan u balaarineyno xafiiskaan barnaamijka wada sheekeysiga dadka deegaanka ee jaamacadaha iyo shaqaalaha raadinayo inay dib u bilaabaan dhismooyinka xafiiska sida hoy la wadaago ama guriyeynta shaqaalaha.

Ugama tageyno wax dhagaxaan ah iyadoon la badelin markii ay timaado dhisida, illaalinta iyo dib u hagaajinta guryaha dhammaan caasimadeena.

---

Barito, waxaan siideyneynaa **Qorshaheena Tallaabada Ka hortaga Barakicinta** ee abid ugu horeeyay, sababtoo ah kobaca Boston waa inay xasilisaa qoysaska oo ay adkeysaa xidadadooda.

Sidoo kale waan ku faanaa inaan ku dhawaaqo bilaabida **Barnaamijka Tijaabada Wada Ibsashada** (**Co-Purchasing Pilot Program**) ee caasimadeena:

Caawinta qoysaska waxay ka koobanyihiin awoodooda ay ku iibsadaan guryaha qoyska badan oo leh danaha 0% deymaha Caasimada oo dib loo dhigay.

Guryo badan—oo ay ku jiraan keyga—qoysaska jiilalka badan waxay wadaagaan saqafka isku mid ah. Wada Ibsashada waxay ka dhigi kartaa iibsashada guri la heli karo, oo waxay ka dhigtaa cunto wadaagida iyo waqtiyada ay ku dhisanyihiin qeyb nolosha ka mid ah:

Waxaan ku soo koray kumanaan mayl ee u dhaxeeyo aniga iyo awowgeyga-ayeydeyda; waxaan badanaa ku aqiinay dhinaca bashqadaha gaduudan ee wacitaanada Sannadka Cusub iyo baaxada dheer. Maanta, carruurteyda waxay kula koreen ayeydooda dabaqa hoose badelkii ay badweynta kala fogaan laheyd.

Caasimada ugu fiican ee qoysaska waa inay fududeeyaan inay la noolaadaan dadka aad jeceshahay.

---

Laakiin, kuwa aad u badan, oo daryeela qoyska ma goyn karaan: Massachusetts oo dhan, daryeelka maalinta gaarka ah iyo dugsiga hore ayaa si fudud u gooyo $2,000 bishiiba, oo canugii ah.

Laakin barito subixii, dhammaan Boston oo dhan, ku dhawaad 5,000 geedo- iyo afar sanno jir ayaa u socdaalayo fasalada dugsiyada hoose, xarumaha bulshada, iyo guryaha—oo waxbarashada hore oo bilaash ah iyo pre-K.

Hooyo ahaan, iyo sida Duqa magaalada, waxaan ka dhigay mudnaanta lagu kobcinayo barnaamijkaan sannad walba maadaama aan xafiiska la wareegnay—inagoo ku dareynayo in ka badan kumanaan kuraas cusub oo ay isticmalayaan bartayaasheena ugu da'da yar.

Markii ay timaado korinta qoyskaaga, Boston waxay noqoneysaa tuulada ay kugu qaadayso.

Miisaaniyadaha qoyska ayaa sidoo kale culeys ku koray biilasha tamarta oo sareeyo. Marka waxaan ka faa'ideysanay awoodeena wadajirka ah ee iibsashada lagu bixinayo tamar la goyn karo iyo nadaafad loo marayo **Korontada Dooqa Bulshada Boston** (**Boston Community Choice Electricity**)—iyadoo loo badbaadinayo dagayaasha iyo ganacsiyada in ka badan $260 milyan.

Laakiin haddii uu gurigaaga si fiican u daboolneyn….waxaad isticmaaleysaa kululeeyayaasha goobta…ama kariyaha dhacsan…waxaad isticmaashaa wsax badan si aad u diirnaataan.

Marka, caawa, waxaan ku dhawaaqayaa **Keydiyaha Tamarta Boston (Boston Energy Saver)**: Iskaashi cusub oo taariiqi ah iyo Eversource iyo National Grid ee gaarsiineyso in ka badan $150 milyan oo maalgelinta gobolka oo dagayaashaada si loo cusbooneysiiyo guryahadooda iyo loo yareeyo biilashooda. Haddii aad u baahantahay daaqado cusub ama nidaamka kululeynta la cusbooneysiiyay, waxaan u heleynaa doolar walba in la helo in shaqada loo sameeyo.

Iyo sababtoo ah dhismooyinka waa isha ugu weyn ee qiiqa caasimadeena, laga bilaabo kuleelahaan, dhammaan dhismooyinka cusub ee weyn ee Boston waxay noqoneysaa ebar saafi ah laga bilaabo maalinta koowaad.

Hogaaminteena cimilada waxay ka dhigeysaa guryaha kuwa aad loo heli karo, cagaarka dhismooyinka weyn, iyo abuurista fursadaha ee dhalinyarada sida **Slader**—kaasoo ku noolaa hoy afar sanno ka hor. Wuxuu yimid

Mareykanka isagoo todoba jir ah oo ka yimid Haiti, ka tagay guriga 18 sanno jir, oo u dambeeyay wadada.

Maanta, **Slader** wuxuu injineer ka yahay dhismaha Magaalada hoose—doorka uu ku soo galay dhinaca barnaamijka shaqooyinkeena cagaarka Caasimada, **Boston PowerCorps**. Iyo, sannadkaan, shaqaalaheena iskaashiga cusub ee cimilada waxay bilaabi doonaan tababarka 1,200 deganayaal badan ee dhisayo xeebo adkeysi badan iyo bulshooyin.

Caasimada ugu fiican qoysaska, waa inay mudnaan siisaa barnaamijayada badbaadiyo lacagta qoysaska, dhammaanteena caafimaad nagu hayso, oo aan u dejino dhalinteena inay naga dhaxlaan caasimada ugu fiican ee caalamka.

---

Iyo caasimada abuurto waxbarashada dadweynaha, waa inaan u dejinaa heerka dadka kale si loo daboolo. Halkaas ma gaarin weli, laakiin maanta, dugsiyadeena dowlada waxay hayaan wadada saxda ah oo si adag u dhisayo heer sare:

Diiwaangelinta BPS waxay u koreysaa markii ugu horeysay oo toban sanno jir. Heerarka qalin jabinta ayaa kor u kacay, maqnaanshaha joogtada ah ayaa hoos u dhacay, natiijooyinka isla xisaabtanka gobolkeena ayaa muujinaya hormar macno leh. Iyo waxaan gaareynaa go'aano adag laakiin muhiim cabirka ku haboon degmadeena iyo si fiican ugu adeegno ardaydeena.

Sannad dugsiyeedkaan, markii ugu horeysay abid, qoysaska waxay raadraaci karaan baska ardayda, iyo BPS ugu dambeyntii waxay haysaa xogta ardaydee ayaa raaceyso maalmahee. Maanta waxaan isku celcelineynaa boqolkiiba 94% ee basaska imaanaya waqtigooda, oo waxaan qaadeynaa tallaabooyin badan oo lagu wanaajinayo jadwalka sannadkaan.

Maanta, ku dhawaad dhammaan dugsiyadeena waxay ku karinayaan cuntooyin caafimaadan goobta, laga keenay beeraha Massachusetts, marka ardaydeena waxay haystaan shidaalka ay diirada ku saaraan iyo bartaan.

Iyo barayaasha BPS waa horyaalada gobolka sidoo kale: Maamulaha Kaaliyaha Guuleysanayo ee Massachusetts, La taliyaha Dugsiga, iyo Macalinka Sannadka.

Waan ku faanaa inaan midaas soo sheego, xaley, waxaan gaarnay heshiis sadex sanno oo ku meelgaar ah oo aan la yeelanay Ururka Macalimiinta Boston. Kaalisooyinka dugsiga, la taliyayaasha, iyo barayaasha u adeego qaar ka mid ah shaqooyinka ugu muhiimsan ee caasimadeena. Waad ku mahadsantahay sii wadida in la hormariyo ardaydeena maalin walba.

Iyo hormarinta ardaydeena waxay ka dhigantahay maalgelinta iskaashiyada u diyaariyo iyaga guusha:

Deyrtaan, fasalka ugu horeeyay ee la balaariyay oo leh 200 oo ardayda fasalka saggaalaad waxay ka bilaabayaan **Akaademiyada Xirfadaha Caafimaadka Edward M. Kennedy (Edward M. Kennedy Academy for Health Careers)**, waxaa mahadaas leh deeqda $38 milyan ee ka timid **Bloomberg Philanthropies** si loogu dhiso iskaashiga qaranka hogaaminayo ee **Mass General Brigham**…

Waxaan sidoo kale rabaa inaan u mahadceliyo **UMass Boston** oo balaarintooda waxa suurtogalka u ah ardayda **Machadka Ruth Batson (Ruth Batson Academy)** ee albaabka xigga…Iyo waxaa mahadaas leh **Aasaaska Martin Richard (Martin Richard Foundation)**, Dorchester Field House waxay ka bilaabayaan halkaas bisha xigta.

Sannadkaan, waxaan sidoo kale iskaashaneynaa **Machadka WPS (WPS Institute)** si loo hubiyo ardayda fasalka 7aad iyo 8aad waxaa loo diyaariyay inay sameeyaan faa'idada ugu badan ee dugsiga sare…waxaan la shaqeyneynaa **Bain** si aan u xoojino marinada kulliyada hore…iyo waxaan ku biireynaa badrooniyada si aan u sadex jibaano cabirka barnaamijka iskaashiga ee **Madison Park** si markaas ardayda ay u kasbadaan aqoonsiyo iyo u bixino jeega mushaarka islamarkaasba.

Waxaan ku xireynaa dhalinyaradeena waxbarasho heer sare oo qaali ah: tacliin adag, waxbarashada xagaaga iyo shaqooyinka, kadib kobcinta dugsiga, ciyaaraha ardayda, iyo helitaanka farshaxanka.

Sannad dugsiyeedkaan, barashada waxay bilaabataa sida ugu dhaqsiha badan ee sannad dugsiyeedka ugu dambeyay uu dhammaado:

Waxaan u dejinaa diiwaano cusub ardayda ka diiwaangashan waxbarashada xagaaga Sadexda bilood ee 5aad iyo ka shaqeynta shaqooyinka mushaarka leh ee xagaaga; oo sii wax ka badan 3,000 casharada baskiilka bilaash ah iyo 6,000 casharada dabaasha oo bilaash ah.

Kooxdeena Adeegyada Aadanaha waxay gacan ka geystaan maalgelinta qalabka iyo qidmooyinka ee 55 ururada ciyaaraha dhalinyarada, taasoo hubineyso in lacag bixinta aysan caqabad ku aheyn dhalinyarada rabaan inay ciyaaraan.

Iyo waxaan badeleynaa xaqiiqda ah in—arday badan—kadib xisaabta dugsiga, sayniska, iyo barnaamijyada tejnoolijiyaad aad ayay qaali u tahay ama aad u fogtahay.

**Miguel**, waa ardayda fasalka 6aad ee **Dugsiga Hal abuurka Holmes (Holmes Innovation School**): wuxuu ordaa orodka, oo ciyaaraa kubada koleyga, oo wuxuu rabaa inuu noqdo duuliye maalin un. Wuu ogyahay in duuliyaha u baahanyahay inuu garanayo xisaab si u xisaabiyo waxyaabaha sida qorshooyinka duulimaadka iyo dagitaanada xaalada degdega. Laakiin Holmes ma bixiyaan hadda barnaamijyada xisaabta dugsiga kadib.

Caawa, waan ku faraxsannahay inaan ku dhawaaqo inaan bilaabeyno qeyb cusub oo barnaamijyada Xisaabta Hormarsan ee gudaha Dugsiyada Dowlada Boston!

La kaashiga **Mashruuca Dhalinta (Young People's Project**) iyo **Mashruuca Xisaabta (Calculus Project)**, waxaan bilaabeynaa naadiyaha xisaabta, tartamada, iyo bulshooyinka xisaabta hormarsan, si markaas ardayda sida **Miguel** u ogaadaan in koorsooyinka xisaabta hormarsan ay tahay meesha ay ka tirsanyihiin.

Sida farshaxanada, sannadka la soo dhaafay, 50,000 arday iyo xubnaha qoyska ayaa booqday mid ka mid ah matxafka Boston oo bilaash—kumanaan oo markii ugu horeysay ah—oo dhinaca barnaamijkeena Maalmaha Qoyska Boston.

Sannadkaan waxaan ku dareynaa goobaha Boston's Revolutionary—Paul Revere House, Old North Illuminated, Old State House, Old South Meeting House, iyo USS Constitution sidoo kale sida machadyada farshaxankeena bandhiga hogaaminayo: ArtsEmerson, Boch Center, Wheelock Family Theatre, Huntington Theatre, Boston Lyric Opera, Boston Symphony Orchestra, iyo Boston Ballet. Waad ku mahadsantihiin jaalalkeena cajiibka ah oo midaan suurtogal nooga dhigay!

Iyo, caawa, waxaan ku dhawaaqayaa bilaabida **BCYF Creates**, maalgashi oo barnaamijka farshaxanka bilaashka ah taasoo laba jibaareyso waxbarashada farshaxanka oo xarumaha bulshadeena oo dhan.

Marka haddii aad tahay arday ku faraxsan inuu sahmiyo taariiqda wadankeena, qaato bandhig, isku dayo ciyaar cusub, ama ku biiro kooxda xisaabta, waxa lagaa rabo inaad sameyso…waa ku noolaanshaha Boston.

---

Iyo gudaha Boston, ahaanshaha caasimada ugu fiican ee qoysaska waxay ka dhigantahay taageerida xubnaha qoyska oo jiil walba.

Isniinta, waxaan ku dabaaldagay Maalinka St. Patrick (St. Patrick's Day) ee Xarunta Waayeelka East Boston (East Boston Senior Center). Hilibka lo'da iyo kabajka, ayeeyada lagu magacaabo Judy ayaa taas ii sheegtay, kadib markii

ninkeeda uu dhintay, waxay noqotay waardiye isgoys ah, sababtoo ah waxay sare u qaaday ruuxeeda—roob, dhalaal, ama baraf—si loo arko in dhammaan wajiyada dhoola cadeeyo ay ku socdaan kana imaanayaan dugsiga. Waxay ku qaadataa saacadaha inta u dhexeysa ka tagida dugsiga iyo ka qaadida iyo saaxiibada xarunta waayeelka.

Dadka deegaanka sida **Judy**, si wadajir ah ee **Ethos** iyo jaalalka gobolka, waxaan ku dareynaa maalin dheeraad ah isbuuciiba ee barnaamijka waayeelka ee **Elks** ee West Roxbury, oo waxaan ku dareynaa barnaamij cusub ee waayeelka oo shan xaafadood oo dhan xagaagaan.

Sidoo kale, Golaha Deegaanka iyo aniga waxaan rajeynaynaa inaan la shaqeyno Aqalka Dawladda, Duqa magaalada, iyo Xildhibaanka Gobolka si aan ugu dambeyntii u ansixino biilkeena lagu yareynayo canshuurta ardayda oo loogu haynayo waayeelada guryahooda.

'Waayeeladeena waa taariiqda nool ee Boston—waxay na tuseen waxay ka dhigantahay in loogu noolaado farxad bulshada, iyo adkaanshaha loo marayo dhammaan caqabadaha aan hoos u wada wajahnay.

---

Labo bilood—(oo dareento sida labo sanno)—ka hor, waxaan ku soo dhaweynayaa gabadheyda caalamkaan.

Runta ayaa ah, ma ahan caalamka aan filanayo ama iyada u rajeynayo.

Waxaan u rabaa ainay ku korto wadan loo bogo, oo aan laga baqin. Wadan xasiloon oo badqab ah, aan ahayn mid umuuqda inuu sii xumaanayo.

Waxaan rabaa inay ku korto Ameerikada Paul Revere uu waday...in Dhaqtar King u soo baxo...ee waalidkay guriga uga soo tageen.

Waa isla Ameerikada in hogaamadeena diinta ee St. Paul ay isku birsadeen oo ay ku doceysteen…iyo in dadka Boston ay ku soo baxeen oo loo dagaalamay…jiil walba, oo 250 sanno.

Waa nooca Ameerika ee ka mid ah ma ahan boqorada laakiin walaalaha, meeshaasoo shaqaalaha ay sharaf leeyihiin, iyo sayniska uu dhab ka yahay. Meesha ay suurtogal ka tahay in laga tago ku noolaanshaha wadada lana aado ka shaqeynta Magaalada hoose, iyo ogeysiinada ka saarida waaxa lagu badelay furayaasha gurigaaga koowaad. Meesha tamarta ay nadiif tahay oo la goyn karo, iyo meelaha ugu fiican ay bilaash u tahay qof walba; meesha dugsiga uu leeyahay illaha iyo iskaashiyada la tartamo arday walba, iyo arday walba uu leeyahay boos uu ku koro iyo ku abuuro.

Aqbaarta fiican waa: Taasi waa Ameerikada aan ka dhiseyno Boston.

Marka iyadoo waqtigaan qaranka aysan aheyn mida aniga—iyo qoysas badan—waxaan rajeynay, waan ku faraxsannahay in gabadheyda ay ugu yeerto caasimadaan gurigeena.

Boston ma ahan caasimada u dukqaadato kaligii taliye.

Waxaan nahay caasimada hogaamiso duufaanta; hor joogsato cadaadis, wadajirkeena; oo aan ka helno awooda midba midka kale. Waxaan ku difaaceynaa dadka aan jacelnahay waxa aan hayno oo dhan.

Waan weydiin waayay wax badan qoyska.

Illaahow barakeey Caasimadeena, Illaahayow barakeey dadkeena, iyo Illaahayow badbaadi cid walboo xumeyso Boston.